

Barnaamijka daryeelka ilmuhu waxa uu daruuri u yahay shaqaalaha daryeelka caafimaadka, shaqaalaha gurmada degdeg ah iyo shaqaalaha daruuriga ah kuwaas oo aan markaa awoodin inay gurigooda ku shaqeeyaan. Hoos waxaa ku yaala tilmaamo dheeraad ah oo bixiyayaasha loogu talo geley oo ku saabsan COVID-19. Waxa aanu sidoo kale ku darnay taageerada bixiyayaasha waxbarashada hore in lasii wado oo markaa ay shaqeeyaan wakhtigan adag.

Caabuuq ka Dilida iyo Nadiifinta Lagu Taliyay

Si bixiyayaashu usii wadaan shaqadooda, cadaymaha wakhtigan ee CDC waxay sheegayaan in COVID-19 uu u noqdo muhiim saacadaha ilaa maalmaha waxyaabaha kala duwan. Sidoo kale nadiifinta iyo jeermis ka dilida deegaanka iyo alaabta ayaa ah qaabka ugu wanaagsan ee looga hortagi karo COVID-19. Wixii macluumaad ah ee dheeraad ah, booqo [Websaytka Waaxda Caafimaadka ee bixiyayaasha daryeelka ilmaha](#).

Ciyaarta Banaanka

Ciyaarta banaanku waxa ay daruuri u tahay caruurta korniinkooda. Bixiyayaashu waa inay sii wadaan inay caruurta banaanka geeyaan taas oo markaa kamid ah jadwalkooda maalintii. Wixii agab ah ee banaanka, hawlaha iyo alaabad lagu ciyaaro ee ay taabteen caruurta waa in si dheeraad ah loo nadiifiyaa oo jeermis looga dilaa wakhtigaas.

Early Achievers

Laga bilaabo Maarso 17, 2020, booqashooyinka uruurinta macluumaadka Early Achievers waa la joojiyay. Marka barnaamijyadu ay kusoo noqdaan sidii caadiga ahayn, kooxda macluumaad uruurintu waxa ay ka shaqayn doontaa barnaamijyada waxbarashada hore si markaa loo xaqiijiyo in nidaamka si wanaagsan u socdo. Ka qayb galayaashu waxay iimeel u diri karaan [Child Care Aware](#) wixii taageerada tabobarka ah ee joogtada ah.

Kaydka Taageerada Badal ka ah ee Gobolka (State Substitute Pool)

DCYF waxay leedahay kayd taageero oo badal ah oo lasiinayo bixiyayaasha liisanka haysta oo ay bixiso The Imagine Institute oo waxaana la kordhin doonaa adeegyada. Hadii aad doonayso inaad taageero ka hesho kaydka taageerada badalka ah, fadlan iimeel u dir subpool@imaginewa.org.

Macluumaad Dheeraad ah oo Loogu Talo Geley Bixiyayaasha Daryeelka Ilmaha ee Wakhtigan

Sii socodka tilmaamaha hay'ada, booqo [websaytkeena COVID-19 ee sida joogta ah macluumaadka loosoo geliyo](#). DCYF waxay qirsan tahay in wakhtigan uu yahay wakhti ku adag ganacsiyada yaryar sida barnaamijka daryeelka ilmaha. Nasiib wanaag, Degmooyinka Washington waxay iminka u qalmaan daynta masiibada ee laga heleyo [Maraykanka. Maamulka Ganacsiga Yar](#). Waxa uu sidoo kale wakhtigani noqon karaa wakhti ku adag caruurta aad hayso lefteeda. [Booqo macluumaadkan](#) kala hadlaya COVID-19 caruurta.

Xidhitaanka Barnaamijkaaga

Ka wada hadalka sida in ikhtiyaar loo xidho inta xanuunku jiro waa ikhtiyaar u gaar ah barnaamij kasta oo daryeelka ilmaha ah. Hadii aad xidho barnaamijka, fadlan la xidhiidh liisan bixiyahaaga.

Baahidaada Daryeelka Imaha iyo Xaalada

Wixii bukaan ah ee daryeelka ilmaha, bixiyayaasha u baahan macluumaadka ugu danbeeyay ee daryeelka ilmaha furnaanshihiisa ama bixiyayaasha u baahan kaalmada shaqaalaysiinta ama taageerada, fadlan kala hadal Child Care Aware Family Center 1-800-446-1114.



Daryeelka ilmaha ee Xaalada Degdega ah iyo Ka Tanaasulida

DCYF waxay si kumeel gaadh ah u maal gelinaysaa liisanka daryeelka ilmaha ee xaalada degdega ah si ay u bixiso baahida degdega ah ee daryeelka ilmaha.

Hadii cid kamid ah aagaagu ay doonayso inay bixiso daryeelka ilmaha xaalada degdega ah, fadlan iimeel u dir: emergencychildcare@dcyf.wa.gov. Hadii aad doonayso inaad dalbato ka tanaasulida si aad si wanaagsan uga jawaabto xaalada COVID-19, fadlan isticmaala [foomkan Ka Tanaasulida Daryeelka Ilmaha Xaalada Degdega/Dalabka Balaadhinta](#) oo u dir [Xafiiskaaga Deegaanka ee Liisamada DCYF](#) si uu u dul maro oo uu kuugu ansixiyo.

